

Waxaanu Nahay

Dumarka Qaxootiga ah ee Bristol waa Urrur samo fal ah oo ay sameeyeen koox Dumar ah oo qaxooti ah si ay u horumariyaan waxbarashada, u yareeyaan faqiirnimada, u baahiyaan una ilaaliyaan caafimaadka dumarka qaxootiga ah iyo kuwa magangelyodoonka ah ee degan Birstol iyo agagaarkeeda iyaga oo siinaya talooyin, warbixino iyo taageero.

Guddida maamulka urrurku dhamaantood waa dadka adeegyadiisa isticmaala oo qaxootinimo lug ku leh.

80 dumar ah ayaa sijoogto ah u isticmaala adeegayaga todobaadlaha ah waxaana xubno ka ah in ka badan 800 oo qof oo asal ahaan kasoo jeeda 40 wadan.

“Intii aanan iman urrurkan, waan cidloojiray, waxaan joogijiray guriga. Intii aan imi waxaan dareemaa farxad waxna waa bartaa” Xubin urrurka ka mid ah



Adeegyada aanu bixino

Adeegyada todobaadlaha ah waxaanu ku bixinaa Easton Christian Family Centre, maalinkasta oo Talaada ah – wakhtiyada xilli dugsiyeedka

Waanu soodhowaynaa dumarka qaxootiga ah iyo kuwa magangelyo-doonka ah, dumarka fiisaha ragooda ku jooga iyo dumarka qaxootinimada ka qaatay wadamada kale ee Yurub itii aanay UK usoo guurin.

Adeegyada aanu bixino waxaa ka mid ah

- Galaasyo English ah bilow ilaa level-3
- Warbixin iyo in lagu hadlo
- Qado
- Xanaanada carruurta
- Workshops
- Fursado tabobareed
- Kulamo wargelin ah oo ku saabsan noocyo badan oo tacaddiyada ka dhanka ah haweenka.

Waxaanu leenahay shaqaale xirfad u leh in ay kuu turjumaan haddaad ku hadasho, Somali, Carabi ama Chinese. Waxay shaqaaluhu caawiyaan dumarka u baahan in waraaq loo turjumo, warbixin laga siiyo adeegyada ama la xidhiidhida urrurada kale.

Yaa kharashka naga bixiya

Waxaanu nahay urrur samo fal ah oo ku shaqeeya deeqaha uu ka helo urrurada deeqaha bixiya iyo hay'adaha dawlada. Waxaanu soodhowaynaynaa shaqsiyaadka, shirkadaha iyo ganacsatada deeq na siinaya.

Sida aad noo caawinkarto

Ku deeq

£8.50 waxay xannaanada carruurta ka bixinaysaa ilmo yar.

Waxaad deeqda ku bixinkartaa **Justgiving** www.justgiving.com/rwob

like saar facebook-gayaga

kasoo qaybgal munaasabadaha oo arag waxa ay wadaan Dumarka Qaxootiga ah ee Bristol



Kaalinta Volunteers-ka

volunteers-ku waxay qayb wayn ka qaataan socodsiinta adeegyadayada todobaad kasta. Waxaanu haynaa kaalimo badan oo ay vulanteers-ku buuxinkaraan sida;

- Barista ama caawinta barashada English-ka
- Caawimada barashada akhriska
- Caawimada Kijinka ama jikada
-

Talaada kasta waxaanu dadka waydiinaa inay ugu yaraan 6 bilood volunteer noo noqdaan xilli dugsiyeedka. Waxaanu bixinaa hordhac, kullamo kooxeed joogto ah, fursado tababaro dheeraada iyo reference 3 bilood kadib.

“waa meel wanaagsan oo volunteer laga noqdo. Fursado badan oo aad wax cusub ku tijaabinkarto, xirfado cusub ku barankarto, oo kuu kordhinaya fahanka dadka kale iyo ku kalsoonaanta naftaada”
A RWoB Volunteer.

Fadlan email usoo dir isuduwaha adeegyada todobaadlaha ah
coordinator@refugeewomenofbristol.org.uk
ama soo wac 0117 941 5876 – wixii warbixin dheeraad ah

Nagala soo xidhiidh

Xafiiska RWoB

Unit 35, Easton Business Centre
Felix Road
Easton
Bristol, BS5 0HE

Adeegyada todobaadlaha ah
Easton Christian Family Centre
Beaufort Street
Easton
Bristol BS5 0SQ

Email:

info@refugeewomenofbristol.org.uk

Office Telephone:

0117 9415867

Website

www.refugeewomenofbristol.org.uk

Adeegyada todobaadlaha ah
10.00am – 2.00pm
Every Tuesday during term time
Registered charity **1171683**



Dumarka Qaxootiga ah ee Bristol

Waxaad ka helaysaa Talooyin
iyo taageero fursadaha
waxbarashada, warbixin iyo
caawimo loogu talagalay
dumarka qaxootiga ah iyo
kuwa magangelyodoonka ah

Registered charity 1171683